# Colaadda Gaalkacyo:
## Sababaha Keenay, Kuwa Sii Hurinaya iyo Siyaabaha Loo Xallin Karo



Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

December 2016

Waxaa faafiyay Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, 2016, Muqdisho, Soomaaliya

## Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

Bogga hore: dusha sare ee magaalada Gaalkacyo

Xuquuqda © Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Qoraalka waxaa lagu faafiyey hannaanka Oggolaanshaha Creative Commons Ganacsi iyo macaash looma istic-maali karo https://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/

Kala soo bax qoraalka bogga www.heritageinstitute.org

## Tusmo


Nuxurka Qoraalka ........ 0

Raad-raac ........ 1

Habka Cilmi-baarista Loo Sameeyay ........ 2

Asalka Colaadda ........ 2

Loollan Dhuleed ........ 2

Loollan Dhaqaale ........ 3

Nidaamka Federaalka ........ 4

Waxyaabaha Ka Qeyb Qaata Colaadda ........ 5

Dowladda Dhexe oo Tabar Yar ........ 5

Maamulada Kala Duwan ........ 5

Aragtiyo Kala Duwan ........ 5

Warbaahinta ........ 6

Waxyaabaha kale ee Collaadda Ka Qeyb Qaata. ........ 6

Siyaabaha Loo Xallin Karo Colaadda Gaalkacyo ........ 6

Xalka Koowaad: Magaalo ay Maamusho Dowladda Federaalka ........ 7

Xalka Labaad: Mudug oo loo Qeybiyo Labo ........ 8

Xalka Saddexaad: Puntland iyo Galmudug oo Maamulka Magaalada ku Heshiiya ........ 8

Gunaanad ........ 9

Talooyin Tixgelin Mudan ........ 9

## Nuxurka Qoraalka

- Gaalkacyo waxa ay ahayd magaalo qeybsan tan iyo sanadkii 1993, hase ahaatee colaadda kasoo cusboonaatay magaalada waxaa asal ahaan keenay loollan loogu jiro dhul iyo dhaqaale, wuxuuna loollankan sii xogeystey kaddib markii la dhaqan geliyey nidaamka federaalka.

- Dib u heshiisiin dhab ah oo aan dhicin, labo maamul oo magaalada ka jira, aragtiyo khaldan oo bulshada ka dhex jira, dowladda dhexe oo aan tabar badan lahayn, iyo warbaahinta oo buunbuunisa colaadda ayaa waxa ay qeyb ka qaateen in colaadda Gaalkacyo daba dheeraato.

- Waa in la sameeyaa guddi-bulsheed wadajir ah, kaasi oo ka kooban qeybaha kala duwan ee bulshada si ay u bilaabaan wada-hadal iyo wada xaajood dhab ah oo horseed u noqda in nabad waarta loo helo colaadda Gaalkacyo. Maamullada Puntland iyo Galmudug waa in ay si wadajir ah isaga kaashadaan dhanka amniga isla markaana ay dhisaan guddi midaysan oo sugidda amniga ka shaqeeya, mas'uulna ka noqda sugidda ammaanka iyo xasiloonida magaalada.

- Waxaa jira saddex qodob oo xal waara u noqon kara is mari-waaga Gaalkacyo. Xalka koowaad waa in magaalada Gaalkacyo ay noqoto magaalo ay dawladda dhexe maamusho. Xalka labaad waa mid gobolka Mudug u qeybinaya laba gobol, magaalada Gaalkacyo-na labo loo kala qeybiyo. Xalka saddexaad waa gorgortan iyo heshiis dhex mara labada maamul ee Puntland iyo Galmudug, ayna ku heshiiyaan in midkood uu magaalada maamulo amaba ay dhistaan maamul wadajir ah. Daraaseynta iyo falanqeynta saddexdan qodob waxa ay aasaas u noqon doonaan xallinta is-heysiga ka imaanaya dhanka dastuurka, dhulka iyo dhaqaalaha ee u dhexeeya labada maamul ee ka jira gobolka Mudug.

- Waa in laga gudbaa dhaqanka ah in hoggaamiyeyaasha bulshadu aaney sharciga ka cabsan. Shakhsiyaadka hurinaya colaadda Gaalkacyo waa in lagula xisaabtamaa dhibka ay shacabka u geysanayaan. Dilka iyo barakacinta dadka rayidka ah waa xadgudub weyn oo ka dhan ah sharciga dalka iyo shuruucda caalamiga ah ee bani'aadamnimada. Xafiiska Qaramada Midoobay ee Soomaaliya waa in uu door weyn ka qaataa baaritaanka iyo laxisaabtanka xadgudubyada bini'aadamnimo oo ka dhaca Gaalkacyo.

## Raad-raac

Gaalkacyo waa magaalo ku taala bartamaha Soomaaliya oo ay wadaagaan Puntland iyo Galmudug. Dhanka woqooyi ee magaalada waxaa maamula Puntland, halka dhanka koofureedna ay ka taliso Galmudug. 4tii Juun 1993 ayey hoggaamiyeyaashii jabhadaha SNA, SSDF iyo SNDU oo ay kala hogggaaminayeen Jeneraal Maxamed Faarax Caydiid, Korneyl Cabdullaahi Yuusuf Axmed, iyo Cali Ismaaciil Cabdi-Giir waxa ay Muqdisho ku saxiixeen heshiis xal looga gaarayay dhibaatada aafeysay magaalada Gaalkacyo. Odayaasha dhaqanka iyo waxgaradka labada dhinac ee magaalada ayaa kaalin weyn ka qaatay wada xaajoodka iyo heshiiska.

Heshiiskan kaddib, muddo ku dhow labaatan sano magaalada waxa ay ku jirtay xaalad la oran karo waa ammaan, mana jirin colaad baahsan oo magaalada ka dhacday ilaa 22kii Nofeembar 2015 xilligaas ee uu magaalada ka qarxay dagaal u dhaxeeyay ciidamada Puntland iyo kuwa Galmudug. Dagaalkan oo socday ilaa bishii Diseembar wuxuu sababay dhimashada ugu yaraan 20 qof iyo dhaawaca tiro 120 ka badan. Dagaalku wuxuu sidoo kale sababay barakaca qiyaastii 90,000 oo qof oo kamid ah shacabkii magaalada.[1]

Heshiis nabadeed ayey maamullada Puntland iyo Galmudug kala saxiixdeen 2dii Diseembar, waxaana goobjoog ka ahaa Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya, hoggaamiyeyaasha maamullada Jubaland iyo Koofur Galbeed, odayaasha dhaqanka iyo ergooyin ka kala socday Qaramada Midoobay, Midowga Yurub iyo urur goboleedka IGAD.[2] Muddo ka yar sanad kaddib, 7dii Oktoobar 2016 ayuu dagaal kale ka bilowday magaalada Gaalkacyo kaasoo sababay dhimashada 45 ruux iyo dhaawaca 162 qof oo kale. Dagaalkan ayaa waxaa ku barakacay dad kor u dhaafay 85,000 oo magaalada ku noolaa.[3]

1-dii Nofeembar 2016, hoggaamiyeyaasha Puntland iyo Galmudug Cabdiweli Maxamed Cali iyo Cabdikariim Xuseen Guuleed ayaa magaalada Abu Dhabi ee dalka Imaaraadka Carabta ku saxiixay heshiis xabbad joojin ah, isla markaana magacaabay guddi xal u raadiya colaadda Gaalkacyo, hasa yeeshee heshiiskaas lama fulin dagaaladuna halkoodii ayey kasii socdeen. 18-kii Nofeembar ayey mar kale hoggaamiyeyaashan ku kulmeen Gaalkacyo halkaasna waxa ay ku gaareen heshiis uu goobjoog ka ahaa Ra'iisul Wasaare Cumar Cabdirashiid Cali-Sharmaarke. Heshiiskan wuxuu dhigayay in xabbadda la joojiyo lana sameeyo 2 kiilomitir oo u dhaxeysa labada ciidan oo ka caaggan dagaalka.

Saxiixii heshiiskan kaddib, waxaa la sameeyay guddi isku dhaf ah oo ka kooban 18 xubnood, kaasoo mas'uul looga dhigay hirgelinta xabbad - joojinta lagu heshiiyay iyo soo celinta kalsoonida dhinacba dhinaca kale ku qabo. Guddi caalami ah oo xaqiijiya dhaqan-galka xabbad-joojinta ayaa la geeyay magaalada Gaalkacyo. Guddigan oo uu soo diray urur goboleedka IGAD ayna taageerto Qaramada Midoobey ayaa la shaqeyn doona guddiga isku-dhafka ah iyagoo xaqiijin doona dhaqan galka xabbad-joojinta iyo fulinta qodobadii ay labada dhinac ku heshiiyeen.[4]

[1] UN Office for the Coordination of Humanitarian Affairs report http://reliefweb.int/report/somalia/somalia-flash-update-humanitarian-impact-fighting-gaalkacyo-8-december-2015

[2] UN, EU, AMISOM, IGAD welcomed the signing of the Gaalkacyo agreement between Puntland and Galmudug https://unsom.unmissions.org/un-eu-amisom-igad-welcome-signing-gaalkacyo-agreement-between-puntland-and-galmudug

[3] Displacement continues amid recurrent clashes in north-central Somalia – UN" http://www.un.org/apps/news/story.asp?NewsID=55539#.WD-YvjJh3R0

[4] UNSOM Press Release on International Ceasefire Deployed to Gaalkacyo, https://unsom.unmissions.org/international-ceasefire-team-deployed-gaalkacyo-support-implementation-agreement-reached-presidents

## Habka Cilmi-baarista Loo Sameeyay

Cilmi-baaristan waxaa laga sameeyay koofurta iyo waqooyiga Gaalkacyo, Cadaado, Galdogob iyo Garoowe mudadii u dhaxeysay 3 - 13 Nofeembar. Cilmi-baarayaal ka tirsan Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda ayaa u socdaalay labada dhinac ee Gaalkacyo waxa ayna wareysiyo la yeesheen qeybaha kala duwan ee shacabka magaalada, halkaas oo ay kasoo ururiyeen xog ku saabsan fikradaha ay ka qabaan muwaadiniinta labada dhinac, aasaaska colaadda, waxyaabaha huriya iyo waxa xal u noqon kara colaadda Gaalkacyo. Booqashada magaalooyinka Cadaado iyo Garoowe waxa ay cilmibaaristan u ahaayeen muhiim maaddaama qaar kamid ah odayaasha dhaqanka iyo siyaasiyiinta Gaalkacyo ay ku sugnaayeen labadaas magaalo oo ay ka socdeen doorashada dadban ee Aqalka Hoose ee Baarlamaanka Federaalka. Cilmi-baarayaashu waxa ay sidoo kale laba maalmood oo xog ururin iyo waraysi ah ku tageen degmada Galdogob.

Intii ay socotay xog ururinta, cilmi-baarayaashu waxa ay qaadeen wareysiyo badan iyo dood wadaagyo u dhaxeeya xubno kooban oo bulshada ka tirsan. 32 ruux ayaa lala soo yeeshay waraysiyo qoto dheer waxaana dadkii la waraystay ku jiray siyaasiyiin, odayaasha dhaqanka, ganacsato, haween, culimada diinta, aqoonyahanno, arday, iyo xubno ka tirsan xarumaha warbaahinta. Intaa waxaa dheer, 5 dood-wadaag kooban oo ay ka qeyb galeen dhalinyaro, aqoonyahanno, odayaasha dhaqanka iyo dumar ayaa lasoo sameeyay.

Cilmi-baarayaashu waxa ay sidoo kale wareysiyo aan rasmi aheyn la yeesheen shacabka deggan magaalada Gaalkacyo iyo degaanadii kale ee ay booqdeenba. Waxa sidoo kale cilmi-baarayaasha Machadka Heritage ay goobjoog u ahaayeen dagaalkii dhacay 6 Nofeembar ee u dhaxeeyay Puntland iyo Galmudug, kaasoo ahaa dagaalkii ugu waxyeelada badnaa dagaaladii dhawaanahan ka dhacayay magaalada. Dagaalkan wuxuu sababayna dhimashada 26 qof iyo dhaawaca dad ka badan 50 ruux.

## Asalka Colaadda

Colaadda Gaalkacyo waa mid in la fahmaa aanay sahlaneyn isla mar ahaantaana leh wejiyo badan. Waxa ay colaaddu salka ku haysaa dhul iyo dhaqaale. Nidaamka federaalka ee la hirgeliyay iyo dhismihii Galmudug oo ka kooban gobolka Galguduud iyo qeyb kamid ah gobolka Mudug ayaa sii huriyay colaadda. Loollanka loogu jiro dhulka iyo deegaanka iyo rabitaanka ah in dhaqaalaha magaalada la qeybsado ayaa iyaguna ahaa arrimo soo if-baxay kadib markii Galmudug la aasaasay 4-tii Luulyo 2015.

### Loollan Dhuleed

Loollanka dhuleed ee ka jira Gaalkacyo waa mid taariikh dheer leh. Dhul balaarsiyada ay sameeyaan beelaha deggan Gaalkacyo iyo degaanada ku xeeran waa mid soo jiray muddo qarni ka badan. Waxaa muhiim ah in la ogaado in beelaha Daarood ee dega gobolka Mudug (gaar ahaan Majeerteen iyo Leelkase) iyo beelaha Hawiye (gaar ahaan Sacad, Habargidir) ay wadaagaan soohdin dheer ee gobolka Mudug ah. Colaadaha dhulka miyiga waxa ay ku saleysan yihiin ceelal iyo daaqsin, hasa ahaatee colaadda Gaalkacyo waxa ay ku saleysan tahay maamul deegaan iyo dhaqaale. Labada maamul ee Puntland iyo Galmudug ayaa midba midka kale ku eedeeya inuu wado dhul balaarsi.

Is qab-qabsi ku saleysan dhul ayaa wuxuu ka jiray gobolka Mudug kahor xornimadii Soomaaliya iyo kadib intaba. Gumeystihii Talyaaniga ayaa asteeyay soohdin beeleed loo yaqaanay diilinta “Tomaselli” taasoo uu u sameeyay Talyaanigu in uu ku xaliyo is qabqabsiga ku saleysan dhulka. Dhammaan dowladihii Soomaaliya oo ay ku jirto dowladdii militariga ahayd waxa ay ku guul dareysteen xallinta colaadaha dhulka ka dhasha ee gobolka ka dhaca – inkasta oo Gaalkacyo ay hal maamu lahayd. Kaddib burburkii dowladdii militariga iyo bilowgii dagaalladii sokeeye, colaadaha beelaha ee ka dhasha dhulka waxa uu aad ugu xoogeystay Gaalkacyo iyo nawaaxigeeda, waxana dagaalladan ay galaafteen nolosha dad badan waxana ku barakacay shacabkii magaalada.

Dhisme ay Puntland ka bilowday waddo laami ah iyo Galmudug oo dhismaha wadadaas muran ka qabtay ayaa waxaa ka dhashay dagaal bishii Nofeembar 2015 ka dhacay magaalada Gaalkacyo. Dagaalkii Oktoobar 2016 dhacayna waxaa sababay is qab-qabsi dhuleed ee u dhaxee-yay Puntland iyo Galmudug oo ku aadan suuq xoolaha lagu iibiyo oo ay Puntland ka dhiseysay xaafadda Garsoor ee magaalada Gaalkacyo. Cilmi-baarayaasha Machadka Heritage ee xo-gaha ka ururinayay dhanka waqooyi ee magaala-da ayaa bishii Nofeembar 2016 booqday wadada laamiga ee uu dagaalkii hore ka bilowday iyo seyladda xoolaha ee dagaalkii dambe sababta u aheyd. Labadan dhacdo waxa ay tusinayaan in dagaaladii 2015 iyo kii dhowaa ee 2016 ay labaduba ku saleysnaayeen muran ku saabsan dhul.

Inkasta oo colaadihii dhowaan ka dhacay Gaalkacyo ay dhul salka ku hayeen, hadana loollanka dhuleed waa mid ka jira dhammaan de-gaanada gobolka Mudug. Tusaale ahaan, dadkii laga wareystay dhanka Puntland waxa ay ku doodayeen in soohdimaha beeluhu kala leeyihiin ee dhulka daaqsinka ah la yaqaan oo dhammaan beelaha degaanka deggan wada og yihiin, balse dhismihii Galmudug kaddib ay beesha Sacad bilowday in ay ku faafto degaanada galbeedka ka xiga Gaalkacyo oo ah degaano ay leeyihiin bee-laha Majeerteen iyo Leelkase. Waxa ay kaloo dadka laga wareystay dhanka Puntland ku doo-deen in iyagu aaney marnaba u talaabin de-gaanada soohdinta koofur ka xiga balse dadka deggan degaanada Galmudug ay yihiin dad aan xurmeyn soohdinta la kala leeyahay oo ay yihiin dad usoo talaaba degaanada Puntland isla markaana in ay dilal ka geystaan misana u bax-sada dhanka Galmudug. Maamulka Galmudug ayaa dhankooda beeniyay eedeymahan, waxa ayna Galmudug ku doodday in Puntland ay tahay midda dhul balaarsiga sameyneysa. Siyaasi ka tirsan maamulka Galmudug oo ay wareysteen cilmi-baarayaasha machadka Heritage ayaa ku dooday in maamulka Puntland uu doonayo in uu gacanta ku dhigo gebi ahaanba magaalada Gaalkacyo.

Muran kale oo ka jira magaalada ayaa ku saleysan gacan ku haynta koontaroolada ku yaalla wadada magaalada laga galo iyo midda looga baxo. Galmudug ayaa maamusha koontaroolka koofureed, halka Puntland ay maamusho koontaroolka waqooyiga. Hase ahaatee, Puntland ayaa waxaa uu koontarool kale u yaalaa soohdinta ay la leedahay Galmudug ee magaalada Gaalkacyo. Maamulka Puntland ayaa sheegay in ay barta koontarool ay u sameeyeen sababo la xiriira sugidda amniga iyo in kon-taroolku muhiim u yahay la socoshada dhaqdhaqaaqa gaadiidka iyo dadka si looga hortago weeraro ay Al-Shabaab ku qaadaan de-gaanada Puntland.

### Loollan Dhaqaale

Loollanka dhaqaalaha ayaa noqonaya qodobka labaad ee aasaaska u ah colaadda. Gacan ku haynta ilaha dhaqaalaha ee magaalada ayaa ah arin muran ka taagan yahay. Loollankan ayaa xiriir la leh kaabayaasha magaalada. Tusaale ahaan, inta badan dhismayaasha qaranku leeya-hay (dugsiyada waxbarashada, isbitaalada, iyo xarumaha ciidamada) waxa ay ku yaallaan dhinaca ay maamusho Puntland, iyadoo dhowr xarunna ay ku yaalaan dhanka ay maamusho Galmudug. Inta badan dadkii laga wareystay dhanka Galmudug waxa ay qabeen in ay tani tahay garab siin iyo cadaalad darro ay sameeyeen gumeystihii dalka maamuli jiray iyo dowladihii gumeysiga ka danbeeyay.

Inta badan dadkii laga wareystay dhanka Gal-mudug waxa ay ku doodeen in dhammaan xaru-maha uu dhisay qaranka Soomaaliyeed oo ay ku jirto gegida diyaaradaha ee magaalada ay wada leeyihiin dadka deggan magaalada sidaa daraa-deedna ay dalbanayaan in si siman loo adeegsado. Waxa kaloo ay Puntland ku eedeeyeen in ay xa-raasheyso qaar ka tirsan xarumihii qaranka ayna ka iibineyso ganacsato.

Masuuliyiin u hadashay Puntland waa ay qireen in inta badan xarumahii ay dhistay dowladdii dhexe ay ku yaalaan dhanka ay maamusho Punt-land. Waxaase ay ku doodeen in dhammaan

xarumahan loo isticmaalo adeegyo guud, adeegyadaasna ay si siman u isticmaali karaan dhammaan shacabka degan magaalada iyadoo aan loo fiirineyn deegaan ama beesha uu qofku kasoo jeedo. Maamulka Puntland ayaa sidoo kale ku adkaystay maamulidda xarumahan ay iyagu mas'uul ka yihiin maaddaama ay ku yaalaan dhanka Puntland, sida ay Galmudug u maamusho xarumaha dhankeeda ku yaala.

Maaddaama ay hay'adaha dowladda federaalku yihiin kuwo tabar daran, maamul goboleedyada dalka ka jira ayaa gacanta ku haya ilaha dhaqaale iyo xarumaha dowladeed ee deegaanada ay maamulaan ku yaala. Gegida diyaaradaha Gaalkacyo waxa ay ku jirtay gacanta beesha Majeerteen tan iyo sanadkii 1993 markaas oo ay heshiis saddex geesood ah kala saxiixdeen Jeneraal Caydiid, Korneyl Cabdulaahi Yuusuf iyo Cali Ismaaciil. Aasaaskii Galmudug-tii hore ee sanadkii 2006 iyo Galmudug-ta cusub waxa ay sii xoojisay rabitaanka Galmudug ay ku doonayso in ay saami ku yeelato dakhliga kasoo xarooda gegida diyaaradaha ee Gaalkacyo, iyadoo ku doodeysa in gegidu ku taalo dhinaca Galmudug. Puntland dhankeeda waa ay dafirtay sheegashada Galmudug, waxa ayna ku doodeysaa in ay gegida maamulayeen tan iyo wixii ka dambeeyay heshiiskii Jeneral Caydiid iyo Korneyl Cabdullaahi Yuusuf ee sanadkii 1993, isla maraakana ay xaq u leeyihiin in ay sii maamulaan, sidii ay u maamulayeen 23kii sano ee lasoo dhaafay.

## Nidaamka Federaalka

Tan iyo aasaaskii Galmudug ee bartamihii 2015, is mari-waaga Gaalkacyo wuu sii xoogeysanayey. Waxaana la oran karaa, aasaaska Galmudug wuxuu kordhiyey muranka labada dhinac u dhaxeeya ee ku saleysan soohdimaha, dhulka iyo dhaqaalaha magaalada Gaalkacyo. Maamulka Galmudug waxaa haysata caqabad xagga sharciga iyo dastuurka ah. Dastuurka federaalka kumeelgaarka ah qodobkiisa 49aad farqada 6aad wuxuu dhigayaa in laba gobol iyo wixii ka badan ay noqon karaan maamul goboleed. Gobolka Mudug wuxuu ka kooban yahay 5 degmo. Maamul goboleed walba waxaa hoos yimaada 2 degmo oo u gaar ah iyo qeyb kamid ah degmada Gaalkacyo. Maamul ahaan gobolka waxa uu u qeybsan yahay labo maamul. Taasi oo ka dhigeysa in Galmudug ay maamusho gobol iyo bar taasoo ka yar labada gobol ee uu dastuurku shuruudda uga dhigay jiritaanka maamul goboleedyada. Balse Galmudug waxa ay sheeganeysaa in ay ka dhul balaaran tahay Puntland marka loo eego dhulka uu ku fadhiyo gobolka Mudug.

Siyaasiyiinta iyo shacabka laga wareystay dhanka Galmudug waxa ay si isku mid ah u muujiyeen rabitaankooda ah in gebi ahaan gobolka Mudug oo ay ku jiraan Galdogob iyo Jariiban uu galo gacanta maamulka Galmudug. Labadan degmo ayaa ah degaanada ay kasoo kala jeedaan Cali Ismaaciil iyo Cabdullaahi Yuusuf oo kamid ahaa saxiixayaashii heshiiskii 1993. Rabitaankan wuxuu soo shaac baxay kadib markii ay Galmudug dastuurkeeda ku qortay in soohdinta maamulka Galmudug ku eg yahay degmada Burtinle oo 100 kilomitir kabadan u jirta Gaakacyo. Hase ahaatee markii arrinka laga qeyliyay waxa ay Galmudug qodobkaas ku beddeshay in soohdinta Galmudug ku egtahay xadka tan Puntland ay ka bilaabato.

Dhanka kale, Puntland waxaa la aasaasay sanadkii 1998 kahor intii aaney Soomaaliya dhaqan gelin nidaamka federaalka, mana wajaheyso caqabad dastuuri ah sida midka [labada gobol] ee haysta Galmudug. Puntland waxa ay maamushaa degmooyinka Galdogob iyo Jarriiban ee gobolka Mudug waxa ayna ku doodeysaa in Galmudug maamusho degmada Hobyo oo kaliya maadaama Al-Shabaab ay ka taliyaan Xarardheere. Puntland waxa ay sidoo kale ku doodeysaa in rabitaanka Galmudug ay ku dooneyso in ay maamusho gebi ahaanba gobolka Mudug ay tahay gardaro cad, isla markaana rabitaankan uu qeyb weyn ka yahay colaadda taagan. Haddaba, dib u heshiisiin dhab ah, wadahadal, iyo go'aan cad oo laga gaaro mustaqbalka gobolka Mudug waa arrimo muhiim u ah xal u helida colaadda soo noqnoqotay ee ka taagan Gaalkacyo.

## Waxyaabaha Ka Qeyb Qaata Colaadda

Iyadoo ay jiraan sababo asal u ah colaadda Gaalkacyo, waxaa sidoo kale jira waxyaabo kaalmeeyay sii socoshada colaadda Gaalkacyo. Sababahan waxaa kamid ah dowladda dhexe oo tabar daran, laba maamul oo ka jira magaalada, fikrado khaldan oo ay shacabka magaalada kala aaminsan yihiin, warbaahinta oo colaadda buun-buunisa, cabashooyin taariikhi ah, iyadoo aaney jirin dib u heshiisiin dhab ah, shacab iyo ma-liishiyooyin wada hubeysan iyo duqeyntii ay di-yaaradaha Mareykanku mar aan fogeyn u geysteen ciidamo ka tirsan kuwa Galmudug. Arrimahan aan xusnay oo is biirsaday ayaa sii huriyey colaadda Gaalkacyo.

### Dowladda Dhexe oo Tabar Yar

Xilligii gumeystuhu dalka ka talinaayay iyo so-don sano oo dowladnimo Soomaaliyeed la hay-stay dagaaladii sokeeye kahor, Gaalkacyo waxa ay laheyd hal maamul. Tani waxa ay cadeyn u tahay sida dowlad dhexe oo awood leh ay qeyb uga noqon karto nabadda iyo xasiloonida Gaalkacyo. Dowladihii kumeelgaarka ahaa ee soo bilowday sanadkii 2000 waxa ay ku guul dar-reysteen in ay maamulkooda gaarsiiyaan go-bolada dalka. Dowladda Federaalka ee haatan dalka ka talisa waxa ay iyaduna ku guul dar-reysatay in ay xal waara u hesho is mari-waaga Gaalkacyo. Taas waxaa dheer, in siyaasiyiinta iyo shacabka Puntland ay ku eedeynayaan madaxtooyada Soomaaliya in ay colaadda Gaalkacyo la safatay Galmudug.

Inta badan dadkii laga waraystay dhanka Punt-land waxa ay xiganayeen khudbad uu jeediyay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Xassan Sheekh Maxamuud ee uu ku lahaa, "Galmudug intaan la dhisin kahor, Gaalkacyo muuqaalka maanta ay leedahay toban meelood haddii loo qeybiyo meel kamid ah ma laheyn".[5] Waxa ay dadkii la wareystey ku doo-deen in marka magaalada afar loo qeybiyo ay sadex qeyb maamusho Puntland iyo in qeybta ay maamusho Puntland ay tahay mid aad u dhisan oo shacabka iyo maamulka Puntland intaba ay qeyb ka ahaayeen maalgelinta dhismaheeda. Sidaa daraadeed, waxa ay hadalka madax-weynaha u fasirteen in uu yahay mid uu ku inkirayo jiritaankooda isla markaana uu magaalada oo dhan u aqoonsan yahay in ay tahay dhul ay maamusho Galmudug.

### Maamulada Kala Duwan

Arrin kale oo qayb ka ah dagaalada Gaalkacyo ayaa ah labada maamul ee ka jira gobolka Mudug. Gobolku waxa uu leeyahay laba guddoomiye gobol, mid Puntland ah iyo mid Galmudug ah. Magaalada Gaalkacyo ayaa sidoo kale waxa ay leedahay laba guddoomiye degmo iyo laba gole deegaan. Maamulladan kala duwan waxa ay door ku leeyihiin sii socoshada colaadda magaalada maadaama uu jiro loollan u dhaxeeya oo ku saleysan canshuur iyo dhul. In badan oo kamid ah dadkii la wareystay ayaa aaminsan haddii ay Gaalkacyo hesho hal maamul in magaaladu ay nabad noqon laheyd.

### Aragtiyo Kala Duwan

Arrimaha ay cilmi-baarayaashu ku arkeen magaalada Gaalkacyo waxaa kamid ah aragtiyo khaldan oo in badan shacabka ku kala nool dhinacyada waqooyiga iyo koonfurta Gaalkacyo uu midba midka kale ka aaminsan yahay. Qaar badan oo dadka deegaanka Puntland ku nool waxa ay aaminsan yihiin in koofurta Gaalkacyo tahay meel qasan oo aan laheyn wax nidaam iyo kala dambeyn ah, taasoo kooxda Al-Shabaab u sahleysa in ay koofurta magaalada ka qorshee-yaan weerarro ka dhan ah waqooyiga magaalada. Waxay tusaale usoo qaadanayaan weerarkii ugu danbeeyay ee Al-Shabaab ka fulisay waqooyiga Gaalkacyo 21-kii Agoosto 2016 kaasoo sababay dhimashada ugu yaraan 20 qof iyo dhaawaca 30 kale.[6] Qeybo badan oo kamid ah dadka ku nool waqooyiga Gaalkacyo ayaa qaba in dilal qor-

[5] Khudbada madaxweynaha waxaa laga heli karaa: https://www.youtube.com/watch?v=bPzjwpI16lw

[6] "Al-Shabaab claims double suicide bombing in Somalia" http://www.aljazeera.com/news/2016/08/al-shabab-claims-responsibility-somalia-bombing-160821090836552.html"

sheysan oo loo geystay dad hal-door u ah shacabka deegaanka oo ay kamid ahaayeen ganacsato, odayaal, culimada diinta iyo indheergaradba lagu soo qorsheeyay koofurta Gaalkacyo, iyadoo dadka dilalkaas geystana ay koofurta magaaladu u tahay gabbaad ammaan ah.

Dadkii laga waraystay dhinaca Galmudug ayaa dhankooda aaminsan in Puntland ay xaqirto Galmudug isla markaana aaney dooneyn in koofurta Gaalkacyo ay hesho maamul shaqeeya oo xasiloon. In dadka ku nool degaanka Puntland ay koofurta Gaalkacyo ugu yeeraan "Baraxley" oo ah magac ay yasmo ku jirto; in maamulka Puntland uu taageero siiyo Ahlu Sunna Wa-Jamaaca si loo wiiqo Galmudug; in Puntland ay diidday in ay wada hadal la gasho wakiillo uu soo magacaabay maamulka Galmudug; iyo in Puntland bixiso sawir muujinaya in koofurta Gaalkacyo tahay meel aaney wax nabadgelyo ka jirin.

Is dhexgalka u dhaxeeya beelaha dega Gaalkacyo waa mid aad u kooban. Waxaa jirta aragti ah in ciddii u gudubta dhanka kale la dilayo. Waxay ugu yeeraan "isbaaro waa qalbi". Fikradaha aan wanaagsanayn ee uu dhanba dhanka kale ka aaminsan yahay iyo dib u heshiisiin dhab ah oo aan degaanka ka dhicin ayaa la oran karaa qeyb ayey ka tahay dhibaatada ka taagan magaalada.

### Warbaahinta

Warbaahintu door ayey ku leedahay colaadda Gaalkacyo. Qaar ka mid ah dadkii la waraystay, gaar ahaan wakiillada ka socday warbaahinta maxalliga ah ayaa rumeysan in warbaahintu sii shiddo khilaafka ayna buunbuuniso dacaayadaha ay labada dhinac iska faafinayaan. Warbaahintu waxay faafisaa fikradaha qaabka-daran ee dhinacba dhinaca kale uu ka aaminsan yahay, iyagoo waraysta shakhsiyaad ujeedadoodu tahay in colaadda lasii huriyo. Warbaahin ku baraarugsan masuuliyadda ka saaran nabadda waxa ay kaalin ka geysan kartaa wadahadallada iyo dadaallada nabadeed ee xalka loogu raadinayo magaalada Gaalkacyo. Heshiis dhab ah oo magaalada horay uga dhacay ma jiro, sidaa daraadeed, dadku weli ma iloobin cuqdadaha taariikhiga ah oo ay kala tabanayaan.

### Waxyaabaha kale ee Collaadda Ka Qeyb Qaata.

Intaa waxaa dheer, ma jiraan barnaamijyo hub ka dhigis ah oo shacabka hubka looga dhigay. Dadka rayidka ah ee hubeysan waxa ay qeyb ka yihiin dagaallada socda sababtoo ah waxa ay si toos ah uga qeyb qaataan dagaallada.

Dad badan oo kamid ah dadka laga waraystay dhanka Galmudug ayaa ku dooday in Puntland ay marin habaabisay oo ay warbixin aan sax ahey siisay ciidamada Mareykanka ee ku sugan degaanka ku xeeran magaalada Gaalkacyo kuwaasoo dabayaaqadii Sebteembar 2016 duqeeyay ciidamo ka tirsan maamulka Galmudug taasi oo sababtay dhimashada 22 askarta Galmudug ah iyo dhaawaca tiro kale.[7]

Dhacdooyinka noocan oo kale ah ayaa door ku yeeshay sii socoshada colaadda Gaalkacyo. Isku day kasta oo xal loogu raadinayo colaadda Gaalkacyo waa in lagu qiimeeyaa waxyaabaha asalka u ah colaadda iyo waxyaabaha sii kiciya colaadda.

## Siyaabaha Loo Xallin Karo Colaadda Gaalkacyo

Gaalkacyo waxa ay u baahan tahay xal kumeel gaar ah iyo mid waara labadaba. Wakhtiga dhow, magaaladu waxa ay u baahan tahay jawi nabadeed si looga miro dhaliyo wadaxaajoodyada.

Warbixintaan waxa ay soo jeedineysaa in la sameeyo guddi wadajir ah oo ay howshiisu tahay in uu wadahadal dhab ah ka yeesho sidii xal waara loogu heli lahaa colaadda iyo dhammaan arrimaha la isku hayo ee ka jira gobolka Mudug. Odayasha dhaqanka, culumada diinta, ganacsa-

[7] "U.S. accused of killing 22 in misdirected Somalia air strike" http://www.reuters.com/article/us-somalia-security-idUSKCN11Y0UC"

tada, iyo waxgaradka labada dhinac waa in ay nabadeyntan ka qeyb galaan. Odayaasha dhaqanka ee laga qaddariyo geyiga Soomaalida iyo culumada diinta ee ku nool deegaannada u dhaw Gaalkacyo waa in ay sidoo kale taageeraan kana qeyb noqdaan nabadeynta.

Wada hadal dhab ah oo dhinac kasta taabanaya wuxuu sahlayaa dhowridda xasiloonida haatan ka jirta magaalada, in sare loo qaado wada-noolaanshaha iyo is-dhexgalka bulshada, soo nooleynta kalsoonida bulshada iyo yareynta fikradaha khaldan ee ay mujtamacu iska aaminsan yihiin.

Labada maamul ee Puntland iyo Galmudug waa in ay fuliyaan wixii heshiis ah ee kasoo baxa wada-xaajoodka guddigan isku-dhafan ay hormuudka ka yihiin. Dowladda Federaalka iyo Beesha Caalamka waa in ay kor kala socdaan howlaha guddiga isla mar ahaantaana cadaadis ku saaraan labada maamul ee Puntland iyo Galmudug in ay fuliyaan wixii heshiis ah ee kasoo baxa guddiga wadajirka ah.

Intaas waxaa dheer, maamullada Puntland iyo Galmudug waa in ay sameeyaan guddi-howleed wadajir ah oo ka shaqeeya ammaanka. Ka wada-shaqaynta ammaanku waxa ay lafdhabar u noqon kartaa nabadgelyo ay hesho Gaalkacyo. Guddigan waa in uu si buuxda u qaado mas'uuliyadda nabadgelyo ee magaalada. Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Beesha Caalamka waa in ay xoogaggan amni ee wadajirka ah ka taageeraan xagga tababarka, saadka iyo dhaqaalaha.

Ugu dambeyntii, waa in laga gudbaa dhaqanka ah in hoggaamiyeyaasha bulshadu aaney sharciga ka cabsan. Shakhsiyaadka lagu helo in ay hurinayaan colaadda Gaalkacyo ama aan joojinayn iyaga oo joojin kara colaadda waa in lagula xisaabtamaa dhibka ay shacabka u geysanayaan. Dilka iyo barakacinta dadka rayidka ah waa xadgudub weyn oo ka dhan ah sharciga dalka iyo shuruucda caalamiga ah ee bani'aadamnimada. Xafiiska Qaramada Midoobay ee Soomaaliya waa in uu door weyn ka qaataa baaritaanka xadgudubyada bini'aadamnimo ee laga geysto Gaalkacyo.

Wakhtiga fog, waxaa jira saddex talaabo oo xal waara u noqon kara colaadda Gaalkacyo. Xalka koowaad waa in magaalada Gaalkacyo ay noqoto magaalo ay dawladda dhexe maamusho. Xalka labaad waa mid gobolka Mudug u qeybinaya laba gobol, oo ay ku jirto magaalada Gaalkacyo. Xalka saddexaadna waa gorgortan iyo heshiis dhex mara labada maamul ee Puntland iyo Galmudug, kuna heshiiyaan in midkood uuu maamulidda magaalada oo dhan uu masuuliyadeeda qaado amaba ay dhistaan maamul wadajir ah.

Xal kasta wuxuu leeyahay mudnaantiisa iyo caqabadahiisa.

### Xalka Koowaad: Magaalo ay Maamusho Dowladda Federaalka

**X**alkan, Dowladda Federaalka ayaa qaadeysa mas'uuliyadda maamulka magaalada, ammaanka, garsoorka iyo maareynta canshuuraha iyo dakhliga kasoo xarooda garoonka diyaaradaha. Haddii xalkan la qaato waxaa dhici karta in loollanka maamulka iyo dhaqaalaha magaalada ee ay maamul goboleedyadu ku jiraan in uu xal u noqdo. Maaddaama hirgelinta nidaamka federaalka uu sii kiciyay xaaladdii ka jirtay magaalada, haddii magaaladu noqoto mid ay maamusho dowladda federaalka oo ka madax bannaan maamul goboleedyada waxa ay sahli kartaa in nabad iyo horumar ay ka dhalato magaalada.

Dalalka ku dhaqma nidaamka federaalka qaarkood waxa ay leeyihiin magaalooyin sidan oo kale si toos ah u hoos taga dowladda federaalka. Magaalada Diri Dhaba dowladda dhexe ee Itoobiya ayaa maamusha sababtoo ah dowladda Itoobiya waxey u aragtaa in magaalada ay wada dagaan saddex qowmiyadood ee kala ah Soomaali, Oromo iyo Amhara. Gaalkacyo waxa ay leedahay sifooyin la mid ah Diri Dhaba, sidaa daraadeed in ay noqoto magaalo ay maamusho dowladda dhexe waa arrin mustaqbalka xal u noqon karta colaadda iyo is qab-qabsiga magaalada.

Arrinkan waxa uu xal noqon karaa haddii hoggaanka cusub ee dowladda federaalka Soomaaliya kasbado kalsoonida bulshada ku nool magaalada Gaalkacyo oo aan haatan kalsooni badan ku qabin dowladda federaalka.

Si kastaba ha ahaatee, xalkan waxa uu wataa caqabadahiisa iyo daldaloolooyinkiisa. Caqabadda ugu weyn waa mid dastuuri ah. Haddii qodobkan la qaato waa in wax laga bedelaa dastuurka ku meel gaarka ah. Baarlamaanka Federaalka waa in uu sharciyeeyaa isla markaana Galmudug waafajiyaa qodobada dastuurka ee ka hadlaya hirgelinta nidaamka federaalka. Sidoo kale dastuurku waa in uu dowladda federaalka siiyo awood ay ku maamusho magaalada Gaalkacyo. Labada maamul ee Puntland iyo Galmudugna waa in ay iyagana aqbalaan qorshahan. Waxaa kaloo lagama maarmaan ah in dowlad dhexe oo shaqeysa oo tayo leh ay ka dhisan tahay Muqdisho, taasoo aan haatan jirin.

### Xalka Labaad: Mudug oo loo Qeybiyo Labo

Mustaqbalka Gaalkacyo waxaa sidoo kale xal u noqon kara in gobolka Mudug loo qeybiyo laba gobol. Gobol walba oo kamid ah labada gobol uu yeesho laba degmo, Gaalkacyana loo qeybiyo labo, iyadoo la caddeynayo qeyb walba soohdinteeda. Qorshahan waxa uu leeyahay saddex faa'iido. Tan koowaad, waxaa rumoobeysa rabitaanka Galmudug ee ah in ay labo gobol hesho, waxaa meesha ka baxaya caqabadaha dastuuriga ee haatan haysta Galmudug. Tan labaad, waxaa meesha ka baxaya walaaca ay Puntland ka qabto in Galmudug ku fiddo deegaanada Puntland. Ugu dambeyntii, Gaalkacyo oo laba degmo loo qeybiyo waxa ay meesha ka saareysaa murankii dhaqaale iyo dhul ee u dhaxeeyay labada maamul ee magaalada.

Si uu qorshahan u noqdo mid taabba gal ah, waxaa lagama maarmaan ah in Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka ay sameeyaan cilmi-baaris ku aadan juqraafiga iyo soohdimaha gobolka Mudug. Intaas waxaa sii dheer, waa in wax laga beddelo dastuurka federaalka si qorshahan loo sharciyeeyo. Ha yeeshee, khatarta ugu weyn ee ku imaan karta hirgelinta qorshahan waxa ay noqon kartaa damaca ay gobolo kale ku doonayaan in labo gobol loo kala qeybiyo. Hoggaamiyeyaasha dalku waa in ay tixgeliyaan wax walba oo ka imaan kara hirgelinta qorshahan.

### Xalka Saddexaad: Puntland iyo Galmudug oo Maamulka Magaalada ku Heshiiya

Xalka saddexaad ee Gaalkacyo waxa uu noqon karaa wada hadal dhab ah oo ay yeeshaan maamullada iyo bulshada ku kala nool Puntland iyo Galmudug. Natiijo kasoo baxda wadahadalladan waxa ay noqon kartaa labo midkood. Natiijada koobaad oo ah in maamulka magaalada lagu wareejiyo hal maamul, Puntland ama Galmudug, iyadoo maamulkaas uu balan qaadayo in dhammaan dadka deggan magaalada Gaalkacyo ay u sinnaadaan adeegyada dadweynaha iyo saamiga wixii mashaariic horumarineed ah. Natiijada labaad waxay noqon kartaa in wada xaajoodyadan ay ka soo baxaan dhisidda maamul wadajir ah. Kani waxa uu ahaa arrin ay xal u arkeen dadkii lagu soo wareystay Galmudug iyadoo dadka laga soo wareystay Puntland ay muujiyeen in aanay danaynayn qorshaha noocan ah.

Qorshahan intaan la qaadan, waxaa lagama maarmaan ah in la dhiso guddi wadajir ah oo ay magaaladu yeelato; in la bedelo fikradaha khaldan ee ay bulshada labada dhinac kala aaminsan yihiin; in bulshada magaaladu sameyso is dhexgal iyo in labada maamul ee magaalada ay ku qancaan in ay sameystaan maamul ay wadaag ku yihiin.

## Gunaanad

Gaalkacyo waa magaalada keliya ee Soomaaliya ee kala qaybsan oo leh laba maamul oo kala duwan. Xal nabadeed oo laga gaaro colaadda Gaalkacyo waxa uu qeyb ka noqon karaa nabadda Soomaaliya. Sidaa darteed, is mari-waaga Gaalkacyo waa in aan la dhayalsan. Haddii ay colaadda Gaalkacyo sii socoto iyadoo Soomaaliya ay bilowday hirgelinta nidaamka cusub ee federaalka, waxa ay horseed u noqon kartaa colaado kale oo ka dillaaca degaanno kale oo uu is mari-waa ka taagan yahay. Xal u helidda colaadda Gaalkacyo waa in ay ahmiyad sare u noqotaa hoggaanka iyo dowladda Soomaaliya ee dhowaan la filayo in la dhiso.

Hoggaan qaran oo dhexdhexaad ah iyo baarlamaan howl-kar ah oo riixa nabadaynta Gaalkacyo, isla markaana dedejiya dib u eegista dastuurka waxa ay sahli karaan xal u helidda colaadda Gaalkacyo. Mustaqbalka Gaalkacyo waxaa lagu xallin karaa iyada oo loo marayo nidaam dastuuri ah iyo rabitaan siyaasadeed oo la helo. Daneeyayaasha siyaasadda ee kala duwan waa in ay ka doodaan meelna isla dhigaan waxa uu noqonayo mustaqbalka Gaalkacyo. Hoggaamiyayaasha bulshada waa in ay si hufan uga wada shaqeeyaan sidii ay bulshada u sameyn laheyd is dhexgal iyo in ay dhiiri geliyaan wadahadal iyo farriimo nabadeed.

## Talooyin Tixgelin Mudan

- Waa in la dhisaa guddi isku dhaf ah oo wada-hadal dhab ah iyo wada xaajood ka gala in xal waara loo helo colaadda Gaalkacyo. Madaxda dhaqanka iyo culimada diinta ee la xurmeeyo ee deegaanada deriska la ah Mudug waa in ay taageeraan door muuqadana ka qaataan geeddi-socodka nabadda Gaalkacyo.

- Hoggaamiyeyaasha Galmudug iyo Puntland waa in ay garwaaqsadaan in danta shacabka Gaalkacyo ay ku jirto in ay muujiyaan hoggaan wanaagsan isla markaana ay si wanaagsan u gutaan waajibaadka loo doortay.

- Labada maamul waa in ay garawsadaan iskaashi iyo xiriir dhinacyada arrimaha amniga, siyaasadda iyo horumarka ah in ay ka dhigeyso maamulladooda kuwo tayo leh oo nuxur leh. Si loo yareeyo xiisadda iyo colaadda u dhexeysa bulshada Gaalkacyo, waa in ay masuuliyiinta ka fogaadaan eedeymaha iyo baahinta waxyaabaha abuuri kara xiisad iyo colaad ka dhex dhalata bulshada Gaalkacyo.

- Raadinta xal waara oo loo helo colaadda Gaalkacyo waa inuu muhiimad sare u noqotaa Dowladda Federaalka ee dhismi doonto.

- Mudanayaasha cusub ee labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa in ay bilaabaan islamarkaana falanqeyn dastuuri ah ka yeeshaan colaadda Gaalkacyo iyo waxyaabaha ka dhalan kara hirgelinta qodobada xalka u noqon kara magaalada ee kor lagusoo xusay.

- Warbaahinta sida raadiyayaasha gudaha iyo baraha internetka, waa in ay ka fogaadaan hurinta colaadda. Waa in ay qaataan kaalin kobcinta nabadda, islamarkaana baahiyaan barnaamijyo iyo farriimo kor u qaadaya wadahadalka iyo muuqaalka wanaagsan.

- Qaramada Midoobay, oo la tashaneysa Dowladda Federaalka Soomaaliya, waa in ay kaalin hoggaamineed ka qaadataa lasocodka iyo baaritaanka iyo isla-xisaabtanka xadgudubyada xuquuqda aadanaha iyo sharciga biniaadannimada caalamiga ah ee laga geysto Gaalkacyo.

- Beesha caalamka waa in ay ku taageertaa Dowladda Federaalka, Puntland iyo Galmudug dadaallada ay ku xallinayaan dagaallada soo noqnoqday ee Gaalkacyo.

The Heritage Institute

For Policy Studies